


Kulanka Bulshada Ee Glendale

Abril 8, 2026





Ajendaha Kulanka Maanta

- Waxa Dhacay
- Waxa aan Maqalnay iyo Halka aan u Soconno
- Sida aan u Qiimeyneyno Hababka
- Hababka aan Ka Fiirsaneyno
- Fikrad-celin ku Saabsan Hababka iyo Adeegyada
- Tallaabooyinka Xiga
- Noo Sheeg Waxa aad Qabto

Nidaamka Kulanka

Waxaanu maanta dooneynaa in aan dhageysano ra'yigiina. Si taas loo gaaro oo qof kasta uga qeyb qaato kulanka ayaan nidaamkan iyo sharciyada loo dajiyey:

- Waa in kulanka looga qeyb qaataa si ixtiraam iyo isuku dul qaadasho ku dhisan.
- Waxa aan qof kasta ka fileynaa inuu naftiisa ka adkaado oo:
 - In aanu geysan qashqashaad jabineysa sida kulanka loogu kala horeeyo
 - In aanu fara gelin ka qeyb galayaasha si ay kulanka ula socdaan ama uga qeyb qaataan
 - In aanu abuurin jawi cabsi gelin ama qashaqashaad
- Haada rabtit ina Aad ka qeyb gashid waa ina sugta ilaa looga ka yeero si ay u hadhashid . Si loo xaqiijiyo in qof kasta helo fursad uu ku hadlo, qof kasta waxa uu faalada uu dhiibanayaa ku soo koobayaa 3 daqiiqo.

Waxa Dhacay

- **Hab weli lama dooran – weli waxaan idinla baareynaa ikhtiyaarro.**
- Waxaan shaqaaleysiinnay koox naqshadeyn iyo qandaraasle guud si ay u sii baaraan dayactir iyo dhismo cusub si loo fahmo waxa suurtagal ka ah Glendale.
- Waxaan sii wadnaa raadinta aragtida deganayaasha si ay noola hagaan hababka suurtagalka ah.



Tilmaamaha iyo Tallaabooyinka Ficilka ee Mustaqbalka Glendale

MPHA waxay soo diyaarisay mabaadi' iyo talaabooyin ficil oo laga soo ururiyey jawaab celinta dadka Glendale ay bixiyeen kulamadii dhawaan dhacay. Tani waxay ka tarjumaysaa rabitaanka iyo rajooyinka horumarinta Glendale iyo welwelka dadka deegaanka ee ku saabsan barakac, ka guuridda guryahooda, iyo awooddooda ay dib ugu soo laaban karaan Glendale qayb ka noqoshada mashruuc kasta oo dhismo weyn ah. Mabaadi'dan iyo tallaabooyinkan ficil waxay u adeegaan sidii qaab-dhismeed lagu hago tallaabooyinka xiga ee Glendale.

Mabda' #1: Abuur Guryo Sharaf leh oo loogu talagalay 600-ka Qoys ee hadda Glendale ku nool, kuwaas oo ka tarjumaya mudnaantooda isla markaana caawin doona qoysaska ku jira liiska sugitaanka ee MPHA.

Talaabooyin:

- Sahmi dib-u-habaynta lagu daro guryaha jira iyo dhismaha guryo cusub.
- Hubi in naqshadda mashruucu kordhiso ku-noolaanshaha guryaha isla markaana mudnaanta dadka deegaanka la geliyo.
- Hubi in naqshadda mashruucu ilaaliso adeegyada xaafadda oo kobciso bulsho isku xiran.
- Sahmi fursadaha lagu dari karo guryo leh qolal badan iyo kuwo yar, iyo guryo hal dabaq ah oo si fudud loo geli karo.
- Sahmi hababka dhismaha ee yareyn kara baahida dadka looga raro goobta dhismaha inta lagu jiro mashruuca.
- Hubi in naqshaddu la jaanqaado heerarka helitaanka ee gobolka iyo federaalka intii ugu macquulsan.
- Sahmi dhammaan fursadaha suurtagalka ah ee MPHA uga heli karto maalgelin federaal oo joogto ah si loo taageero Glendale, oo ay ku jiraan isticmaalka barnaamijyada HUD ee RAD iyo Section 18.
- Sahmi maalgelinta magaalada, gobolka, iyo federaalka ee taageeri karta dhismaha mustaqbalka Glendale.

Mabda' #2: Mudnaanta iyo codadka dadka deegaanka ka dhig xudunta mashruuca wejigiisa kasta— laga bilaabo fikradda ilaa dhammaystirka.

Talaabooyin:

- Abuur koox talo-bixin deggenyaal ah oo matasha bulshada ballaaran isla markaana la shaqaysa MPHA inta lagu jiro qorshaynta iyo dhismaha, barakaca, iyo hawlaha ballaaran ee dadka deegaanka.
- Dhiirrigeli sameynta goale deggenyaal Glendale, isla markaana taageer inta lagu jiro iyo ka dib dhismaha.
- Diyaari qandaraas barakaca oo qeexaya ballanqaadyada MPHA iyo xuquuqda federaaliga ah ee dadka deegaanka.
- La shaqee qoys kasta si gaar ah si loo diyaariyo ikhtiyaar barakac oo ku habboon baahida qoyskooda.
- Hubi in ilaalinta dadka deegaanka ee soo socda la tixgeliyo qayb ka mid ah mashruuc kasta oo mustaqbalka ah:
 - Deggenyaashu waxay sii wadi doonaan bixinta kirada oo la mid ah 30% dakhliga ay saxday.
 - Dadka deegaanka ee lagu raro meel ka baxsan goobta inta lagu jiro dhismaha waxaa laga dammaanad qaaday inay xaq u leeyihiin inay dib ugu soo laabtaan.
 - Inta suurtagalka ah, dadka deegaanka waxaa la siin doonaa ikhtiyaar ay goobta ku sii joogaan inta dhismaha lagu jiro.

###

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah iyo sidoo kale agabkii kulamadii hore iyo soo koobiddooda bogga maashruuca: <https://mphaonline.org/mpha-housing/portfolio/glendale-townhomes>

Haddii aad xiisaynayo inaad ku biirto kooxda talo-bixinta dadka deegaanka si aad u qaabeeyso mustaqbalka Glendale, fadlan la xidhiidh maamulaha deegaankaaga, Kayse Kruske, tel: (612) 342-1556.

Waxa Aan Maqalnay

- Dib-u-dejin waa walaac
- Hagaajinta xaaladda iyo waxqabadka guryaha
- Hagaajinta ku noolaashaha iyo shaqyinta guryaha
- Ilaalinta iyo hagaajinta astaamaha bulshada iyo xiriirrada
- Hagaajinta helitaanka
- Ku dar unugyo waaweyn iyo yaryar Glendale si loogu waafajiyo qoysaska isbeddelaya

Halka Aan u Soconno

- Kulamada Bulshada ee Aqalka Furan:
Aabriil 8, Maajo 6, Juun 17
- Fikrad-celinta kulan kasta waxaa loo adeegsadaa in lagu sameeyo hab la doorbidayo oo lagu hagaajinayo Glendale, laguna soo bandhigo Juun 17
- Kadib Juun, MPHA waxay diyaarin doontaa naqshado faahfaahsan iyo qorshayaal dhisme
- Xagaagan iyo dayrta, MPHA waxay la samayn doontaa deganayaasha heshiis dib-u-dejin
- MPHA waxay sii wadi doontaa raadinta fikradahaaga ku saabsan naqshadeynta, adeegyada, iyo barnaamijyada kale, sidoo kale waxay bixin doontaa macluumaad ku saabsan isticmaalka qalabka HUD ee RAD Section 18 Blend inta lagu jiro 2026 iyo 2027
- Isbeddelka RAD Section 18 Blend iyo xiritaanka mashruuca qiyaastii Agoosto 2027, iyadoo ku xiran maalgelinta la heli karo

Shuruudaha Qiimeynta

- Shuruudo loo adeegsado qiimeynta hababka hagaajinta
- Ujeedo: In la bixiyo hufnaan iyo isla xisaabtan
- Shuruuduhu waxey turjumayan:
 - Mudnaanta deganayaasha
 - Mudnaanta MPHA
 - Shuruudaha maalgelinta ee ka imanaya HUD, Gobolka Minnesota, iyo kuwo kale

SHURUUDAHA	FAAHFAAHIN	BUUXIYAA?
Mudnaanta Deganayaasha		
Xaaladda guriga & waxqabadkiisa	Horumarinta dibadda iyo goobta, cusboonaysiinta gudaha (dabaqyada, dhammeystirka, qalabka), iyo nidaamyada la cusboonaysiiyey: kuleylinta, qaboojinta, iyo hawo-wareejinta	Haa/Maya/Qayb
Ku-noolaanshaha & shaqeynta	Heerarka guryeynta Minnesota ee dhismaha cusub ee guryaha la awoodi karo: cabbirrada jikada/qolka cuntada/qolka fadhiga, tirada musqulaha; baarkin ka baxsan waddada iyo meel kaydin dheeraad	Haa/Maya/Qayb
Astaamaha bulshada iyo xiriirrada	Albaabbada hore, meel cagaaran oo wadaag ah, meelaha bannaanka ee gaarka ah, iyo adeegyada bulshada/goobta/unugga	Haa/Maya/Qayb
Helitaan	Ikhtiyaarro nolol aan jaranjaro lahayn, ikhtiyaarro nolol helitaan leh	Haa/Maya/Qayb
Dib u dejin	Waxay qaadaysaa qaar ka mid ah dib-u-dejinta goobta gudaheeda, waxayna yaraynaysaa dib-u-dejinta goob ka baxsan	Haa/Maya/Qayb
Mudnaanta Dheeraadka ah		
Unugyo dheeraad ah	Waxay ku darsataa unugyo dheeraad ah oo si weyn loo awoodi karo, oo ay ku jiraan unugyo kala duwan	Haa/Maya/Qayb
Shuruudaha Maalgelinta		
Maalgelin	Awoodda lagu heli karo maalgelin	Haa/Maya/Qayb
Shuruudaha maalgeliyaha	Heerarka helitaanka, heerarka guryeynta Minnesota, heerarka/shuruudaha HUD	Haa/Maya/Qayb
Ilaalinta taariikhiga ah	Haddii uu u qalmo Diiwaanka Qaranka, buuxinta heerarka dayactirka taariikhiga ah	Haa/Maya/Qayb


Hababka Aan Ka Fiirsaneeyno

- Dayactir wata ku daris dhabarka iyo mararka qaar dhinacyada unugyada.
- Dhismo cusub oo noocyo kala duwan leh
- Isku darka dayactir yo ku daris cusub iyo dhismo cusub
- Fadlan ogoow dayactir keliya ma buuxiyo shuruudaha; midaas lama tixgelinayo hadda kadib

Noo Sheeg Fikradaada Goobaha

REHABILITATION WITH ADDITIONS


DAYACTIR IYO KU DARIS



NEW CONSTRUCTION


DHISMO CUSUB

Tusaalooyin Gorshayaasha dabaqa




AMENITIES

ADEEGYO




EVALUATION CRITERIA MET

SHURUUDAH GIMAYNTA WAA LA BULDEY



TRADE-OFFS


SHURUUDAH



Sida hababku u buuxiyaan shuruudaha qiimeynta iyo is-dhaafsiga la xiriira hababka

EVALUATION CRITERIA MET

SHURUUDAH GIMAYNTA COLA BULDEY



TRADE-OFFS

SHURUUDAH



Shaqaaluhu waxay kula kulmi doonaan goobaha si ay qoraallo u sameeyaan uguna jawaabaan su'aalaha.

Noo sheeg waxa aad jeceshahay, waxa aadan jeclayn, iyo waxa kaa maqan!

Tallaabooyinka Xiga

- Fikradaha aad caawa bixisaan waxay saameyn doonaan naqshadaha aan ku soo bandhigi doono kulanka Maajo 6.
- Kooxda talo-bixinta deganayaasha iyo booqashooyinka guryaha/kulamo qof-qof ah.
 - Haddii aad xiisaynayso ka qaybgalka Kooxda Talo-bixinta ama booqashooyin guri/kulamo qof-qof ah oo dheeraad ah la yeelato MPHA iyo kooxda naqshadeynta, fadlan ogeysii Kayse.
- Markaad bixiso fikradaada, waad tagi kartaa; haddii aad qabto su'aalo gaar ah, xor ayaad u tahay inaad weydiiso shaqaalaha MPHA ee goobaha.

Mahadsanid!